— 150 —

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 7 ee 20 Jan. 1988, Meel-

marin Heshiis (Code Of Conduct For Liner Conferences)

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qod. 82aad.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 22 ee 10.10.87, oo Dawladda Soomaaliyeed ku oggolaatay meelmarinta heshiiska Qarama Midoobay ee Gaadiidka Badaha (The United Nations Gonuetion ona Code of Conduct for liner COnferences).

MARKUU GAROWSADAY: Talo soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekadaha.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer Sharcigan Soo Socda:

Qodobka 1aad

Kala Qaybsashada Xamuulka (General Cargo)

K_ala qaybsashada Xamuulka (General Cargo) Gaadiidka Badda waxaa lagu maamulayaa nidaamka 40%.40%-20 sida uu farayo qod. 2aad qaybta 4aad xarafka (a iyo b) ee heshiis ka Qaramada Midoobay ee Gaadiidka Badaha (The United Nations Convention on a Code of Conduct for liner Conferences) oo lagu guddoonsaday Jeneefa 6dii Abriile 1974, kana dhexeeya Wadamada xubnaha ka ah Qaramada Midoobay ee meel mariyey isla heshiiskaa oo Soomaaliya ka mid tahay sida ku cad sharci lam. 22 ee 10kii Okt. 1987.

Qodobk_a 2aad A W O O D S I I N

Wasiirka W/Gaadiidka B_a dda iyo Dekadaha waxaa awood loo siinayaa inuu dekreeto ku magacaabi karo hay'adda Soomaaliya u maamuleysa qaybteeda kaga soo taasi karta qod. laad ee Xeerkan.

> Qodobk_a 3aad Habka Fob jyo C&F

 X_a muulka Ganacsiga oo dalka la keenay ama laga dhaa finayo laguna qaadayo gaadiid badeed, waxaa lagu maamula

يتبعر م

yaa habka FOB (Free on baard) marka dalka la keenayo iyo habka C&F (Cost and Freight) marka dalka laga dhoofinayo

Qodobka 4aad

Gaadiidka Xamuulka

1 Xamuulka Dawladda iyo hay'adaha madax bannaan ee Qaranka waxaa lagu keenayaa laguna dhoofinayaa Maraa kiibta Shirkadda Gaadiidka Badda Soomaaliyeed iyo kuwa ay maamusho ama soo ijaarato.

2. Heshiisyada (L/C) ganacsatada gaarka ah oo la xir iirra keenista iyo dhoofinta xamuulka gaadiidka badda waa inay waafaqsanaadaan nidaamka ku xusan qod laad ee Xeerkan.

Qodobka 5aad

RUQSAD

Shirkadda Gaadiidka Badda Soomaaliyeed waa inay bixi saa ruqsad, markii aysan suurtagal u ahayn keenista iyo dhoofinta xamuulka ku xusan qod. 4aad ee Xeerkan.

Qodobka 6aad

CIQAAB

Hay'ad iyo Ganacsato kasta oo ku xadgudba nidaamka ku xusan qodobka 1aad.3aad iyo 4aad ee Xeerkan, waxaa la gu Ciqaabayaa Ganaax u dhexeeya 5% ilaa 15% qiimaha ba deecada, iyadoo laga eegayo ficilka uu ku kacay lahaystuhu, Qodobka 7aad

 $\begin{array}{l} w_a siirka \ W/Gaadiidk_a \ Badda \ iyo \ Dekadah_a \ waxaa \ awood \\ loo \ siiyay \ meelmarint_a \ Xeerkan \ is_a goo \ kaashanaya \ Guddiga \\ Nooliga \ iyo \ Barka \ Xamuulk_a \ Gaadiidka \ Badda. \end{array}$

Qodobka 8aad

Dhaqangal

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madax weynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmi ga ah ee J.D. Soomaaliya.

Muqdjsho, 20,1.1988

MADAXWEYNAHA J.D.S.

T ----